Nationwide Children's
When your child needs a hospital, everything matters.℠

Helping Hand™ Health Education for Patients and Families

# Baarista dhiigga/cudurada kansarka Tilmaamaha Guri-aadista

# Hematology/Oncology: Homegoing Instructions (Somali)

Waxa noo muhiim ah inaad la socoto horumarka ilmahaagu sameynayo una fiirsato sida uu ilmuhu uga faclelinayo daaweynta kiimikada ee kansarka lagula tacaalayo ("chemo"). Ka hor intaanu ilmuhu guriga aadin, waa in lagu siiyaa tilmaamaha bixitaanka oo ay la socdaan ballanta Xarunta Baarista dhiigga/cudurada kansarka ( Hematology/Oncology Clinic.) Haddii aad baxdo maalmaha fasaxa a todobaad dhammaadka adiga oo aan qabsan ballantii soo laabashada, hubi inaad subaxnimada Isniinta xarunta ka soo wacdo *614-722-3250, ikhtiyaar 4 - taleefanka Kalkaalisada* si aad u qabsato ballan.

Marka ballanta xarunta timadaan, tirada unugyada dhiiga ayaa la fiirin doonaa, oo waxa laga yaabaa in ilmahaaga loo diro baaritaano kale. Waxa fiican in aadan qorsheyaal kale yeelan maalinta aad xarunta imanayso. Muddo ayay qaadataa helitaanka natiijoyinka baaritaanka dhiiga iyo in baaritaanada kale la sameeyo. Ilmahaagu wuxu sidoo kale u baahan karaa waqti lagu siiyo daawooyinka dhiiga iyo kiimoko ku daaweynta.

Caruurta joogta aagga sugitaanka qaarkood ayaa qaadanaya daaweynta kiimiko oo waxa laga yaabaa in aanay iska difaaci karin caabuqa. Sidaas darteed, fadlan ha soo kaxeysan carruur kale ama qof kasta oo kale oo aan fayoobid dareemayn.




**Sawirka 1** Daawooyinka sii qaado isla maalinta aad guriga u sii baxayso.

Copyright 1990, Nationwide Children's Hospital Sii socda…

## Daawooyinka isku-daaweynta kiimikada ee guriga

In kasto daawooyinkaaga kiimikaad ee kansarku ay waxtar u yeelan karaan qofka qaadanaya, haddana waxa jira daraasado muujinaya in dadka daryeela bukaanka qaadanaya daawooyinkaas khaas ah ay la kulmi karaan isbeddelo ku yimaadda unugyadooda jirka.  Daawoyinka kiimikada kansarka waxa loo tixgeliyaa inay yihiin daroogooyin khatar ah waana in taxaddar laga sameeyaa in aanay saameyn dad kale.

Daawooyinka kiimikaad waa in lagu hayaa meel xafidan si aanay si aanay dadka kale u qaadan si aan kas ahayn.  Dumarka uurka leh ama doonaya inay uur yeeshaan waxay u baahan karaan in xubin kale oo qoyska ahi ilmaha dawada kiimikaad u siiso. Taxaddar dheeraad ah waa in la qaadaa si aan daawada kiimikaad u gaarin maqaarkaaga.  Haddii budo ama shey kale soo gaaro maqaarkaaga, isla markaaba maqaarka ku dhaq saabuun iyo biyo.  Daawooyinka kiimikadu jirka waxay dhex maraan dhiiga, kaadida iyo saxarada 48 saacadood ka dib marka la qaato.  Dabool musqusha oo laba jeer biyo ku falaash ka dib marka ilmahaagu isticmaalo inta lagu jiro 48 saacaadood ee hore.

## Qalabka

- Haddii ilmahaagu qabo Broviac ama PICC ama katiitar ama uu qabo baahiyo daryeelka guriga ah oo kale, maamulaha kiiskaaga ama cidda qorsheynaysa isbitaal ka bixistaada ayaa kuu diyaarin doona shirkad xannaano guri oo lagu saleeyay caymiskaaga.  Shirkaddan ayaa kuu siin doona alaabada oo kuugu keeni doonta gurigaaga ama isbitaalka.
- Haddii aad qabto baahiyo daryeel guri oo kale, cidda isbitaalka ka bixistaada qosheysanaysa ayaa kuu diyaarin doona shirkad ku siisa.  Waxaad alaabooyinka kale ka heli doontaa farmeesiyada ama bakhaarada qalabka caafimaadka iyo keydka daawooyinka.
- Kalkaaliso diiwaangashan (RN) ama kalkaaliso xirfadley ah ayaa isbitaalka wax kugu sii bari doonta ka hor intaan ilmahaaga loo dirin guriga.  Fadlan u sheeg kalkaalisada wax ku baraysa haddii aadan ku kalsoonayn inaad bixin karto daryeelka ilmaha ee dhanka guriga.  Badanaa kulano wax dhigiseed badan ayaa loo baahdaa.
- Haddii aadan haysan caymis, kalkaalisada ka dalbo inay wacdo Waaxda Adeegga Bulshada si ay kaaga caawiyaan ilaha kaalmada maaliyadeed.  Haddii aad haysato caymis ama kaalmo dhaqaale oo kale, sida BCMH (Golaha Caruurta Naafonimada Caafimaad Qabta), fadlan hubi inaad wacdo oo aad waydiiso sida daawooyinka loo baxsho.  Telefoonka: (614) 466-1700.
- Waxa laga yaabaa in rijeeto ama waraaq dhakhtarkaaga ka socoto loo baahdo. Waxa laga yaabaa inaad kharashka boostada siiso shirkadaada caymiska ama aad alaabada ka soo qaadato bakhaar ama hay'ad gaar ah.

- Ka hor inta aadan iman xarumaha caafimaadka ama ballamaha isbitaal dhigista, liis ka samee waxyaabaha aad u baahan tahay oo liiska sii adeeg bixiyahaaga. Alaabo dheeraad ah ayaa la codsan karaa ama waxaad wici kartaa shirkada bixisa xannaaneynta guriga si aad alaabada toos uga codsato.

## Qoraalada daawada

- Dhakhtarkaaga ama kalkaalisada ayaa ku siin doona (ama kuu soo diri doona) rijeetooyinka daawo kasta oo aad u baahan doonto. Rijeetooyinkaas waxa loo diri karaa farmeesiigeena ama farmeesi ka ag dhow gurigaaga. Waxa laga yaabaa in caymiskaagu u baahdo in alaabooyinka iyo daawoyinka qaar laga soo dhex diro shirkad daryeel guri. Tan waxa agaasimi kara dhakhtarka, kalkaalisada ama cidda qorsheynaysa isbitaal ka bixista. Ha moogaan inaad weydiiso wixii su'aalo ah ee aad ka qabto qiyaasta, jadwalka iyo sababta daawooyinka.
- Waa muhiim in rijeetooyinka ama daawooyinka dhakhtarku qoray la sii qaatay maalinta bixitaanka si aan ilmo u seegin kuuro (Sawirka 1, bogga 1).
- Qaadashada tallaalka ("tallaalka carruurta") ama qaadashada asbiriinka ama ayba-borofiinta inta daaweyntu socoto waxay ilmahaaga u keeni kartaa dhibaatooyin. Dhakhtarka ama kalkaalisada ilmaha weydii daawooyinkan ka hor inta aadan ilmaha guriga u kaxeynin.



## Nafaqada

Daaweynta kiimikada, shucaaca iyo cudurka qudhiisa ayaa yareyn kara amateedka ilmahaaga. Amateedka inuu yaraado ayaa la filaya inta daaweyntu socoto iyo dhowr cisho oo daaweynta ka dib ah, balse ilmahaagu wuxu u baahan yahay inuu nafaqo fiican helo si uu dib ugu sameysan karo unugyo caafimaad qaba, ula dagaalamo cudurada, uguna adkeysto daaweynta kiimikada.

Waxa laga yaaba inay ku caawiso inaad cunto u yaryareyso ilmaha oo marar badan siiso. Hub inaad dhakhtarka u soo sheegto amateed la'aanta ama miisaan lunkiisa haddii uu sii jiro wax ka badan hal todobaad daaweynta ka dib.

**Mafkaad wacdo, dhakhtarka wuxu u baahan doonaa inuu ogaado:**

- Magaca ilmahaaga, taariikhda dhalashada, iyo baaritaanada
- Dhibaatada hadda iyo muddada uu ilmahaagu qabay
- Taariikhda iyo nooca daaweynta kiimiko ee ilmahaagu qaatay
- Natiijooyinka baaritaankii dhiiga ee ilmahaaga ee u dambeeyay

Daawo kasta oo kale oo ilmahaagu qaadanayo.

## Dugsiga

Waanu kaa caawin doonaa go'aaminta xilliga ilmahaagu diyaar u noqonayo inuu dugsiga ku laabto.  Dugsiga ilmahaagu waa inuu macalin guri soo diraa illaa inta ilmuhu fasalka dib ugu laaban karayo.

Carruurta qaar ayaa dugsiga qayb ahaan maalinta ku laabta dabadeedna si tartiibtartiib ah si dhammeystiran ugu laabta.  Xiriiriyaha waxbarashada ayaa idin la diyaarin kara qorsheyaasha dugsiga ama waxaad si toos ah ula xiriiri kartaan shaqaalaha dugsiga.  Markaanu ogolaansho kaa helno, waxaanu macluumaad siin karnaa dugsiga, xilliaga cudurka ilmahaaga laga helo iyo marka uu ku laabanayo dugsiga labadaba.

## Dejinta xanuunka

Xanuun wuxu calaamad u yahay in wax ka khaldan yihiin jirka ilmaha.  Ha moogaan inaad soo gudbiso xanuun kasta oo ilmahaagu marayo si aanu sababtiisa u raadin karno.  Haddii ilmahaagu daawooyin xanuun baabi'iyayaal ah ku qaadanayo guriga balse aanay waxba u tarayn, soo wac dhakhtarkaaga cudurada dhiigga/kansarka sama dhakhtar ilmahaaga.

## Unugyada Dhiigga oo Hooseeya

Dhiigu wuxu bilaabaa inuu hoos u dhaco 7 illa 10 beri ka dib qaadashada daawooyinka kiimikada kansarka badankooda.

**Wac Xarunta Hematology haddii ilmahaagu leeyahay mid ka mid ah calaamadahan:**

- **Caabuqa:** Qandho (heerkul 100.4 digrii F ah ama ka sarreeya), qarqaryo, finan, kaadi ku gubeysa, dareera dhegaha ka imanaya, cuno xanuun, shuban, qufac joogto ah, dareere ka imanaya tuubada cunaha la geliyo, qoor adeyga, meel kasta oo guduudata, diirimaad, ama xanuun.  Sidoo kale u baylah noqoshada cudurada faafa, khaasatan jadeecada ama busbuska.
- **Dhiig la'aan/dhiig yari (heemogaloobiin hooseysa)** Midab-dilan, dawakhaad, itaal darri, daal, adkeysi la'aan, degenaansho la'aan, qaboow dareemis, naqas ama hawo qabdad.
- **Xinjiroow-yari (Saxanyarooyingka dhiiga oo hooseeya):** Nabaro yeelasho, finan yaryar oo jirka hoostiisa ah, hungis ama dhiiga sanka ka yimaadda, afka ama cirrada oo dhiiga, kaadi cas ama casuusi ah, matag "kafee" u eg, saxaro casaan ama madow xigeen ah, madax xanuun, dhibaato hurdo ka toosidda ah.

## Wac 911, ama Adeegyada Gargaarka Caafimaadka Degdega ah ISLAMARKIIBA haddii ilmahaagu:

- Aanu neefsan karin
- Uu leeyahay maqaar iyo dibno buluug ah
- Aanu awoodi karin inuu soo tooso
- Uu suuxayo ama qallalayo

## Wac dhakhtarka cudurada dhiiga/kansarka haddii...

**Ilmahaagu wuxu leeyahay astaamo caabuq muujinaya haddii uu leeyahay:**

- Qandho (heerkul ah 100.4 digrii F ama ka sarreeya)
- Qufac
- Nabaro aagga barida ama salalka ah
- Nabar ama jarriin aan bogsanayn
- Juucjuuc iyo inaan fayoobayn

**Ilmahaagu wuxu leeyahay astaamo dhiig-bixiseed haddii uu leeyahay:**

- Hungis ama dhiiga sanka ka imanaya oo ku joogsanayn marka shey lagu cadaadiyo 5 daqiiqo ka dib ama wax ka badan.
- Nabarada oo aan dhiigu ka joogsaneyn ka dib marka meesha dhiig baxaysa la cadaadiyo muddo shan daqiiqo ah.
- Nabarada maqaarka ka kor muuqda oo si degdeg ah u kora, dhibco cascas oo maqaarka ku kor yaalla, dhiiga caadada oo kordha, dhiig kaadida soo raaca.
- Madax-xanuun daran, matag kedis ah, iyo heerka feejigada ama soo jeedka oo hoos u dhaca.

**Ilmahaagu wxu dhibaato kala kulmaya cunto cunista:**

- Nabaro afka ah oo saameeya cunitaanka
- Dhibaato kala kulmayo calaalinta.

**Ilmahaagu wuxu qabaa dhibaato marinka dheefshiidka ah:**

- Uu matagayo ama aanu u awoodin inuu liqo cuntada adag iyo dareeraha
- Xanuun kala kulmayo saxarada
- Shuban socda wax ka badan hal maalin
- Saxaro la'aan 1 maalmood ama ka badan ah

**Ilmahaaga waxa kudhacay busbus ama jadeeco.**

**Markasta oo aad u baahato inaad ogaato waxa habboon in la qabto!**

## Lambaro Teleefon oo Muhiim ah

**Xarunta Hematology**: Isniin illaa Jimce, 8 SUBAXNIMO illaa 4:30 GALABNIMO (614) 722-3250, ikhtiyaar 4, taleefanka kalkaalisada.

**Hawlwadeenka Isbitaalka Carruurta ee Qaranka (Nationwide Children's Hospital Operator)** Sabtiyaha, Axadaha, fiidadka iyo xilliyada fasaxa ah (614) 722-2000. Ku weydii dhaqtarka dhiigga wacitaan ahaan.